



BUUG-YARAHA DEEQAHKA KU SALAYSAN BAAHIDA EE EARLY ACHIEVERS



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES



Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

*Buugan wuxuu bixiyaa hagitaan iyo siyaasado loogu talagalay Deeqda ku salaysan Baahida
Early Achievers.*

TUSMADA

TUSMADA	1
Qaybta 1: Macluumaadka Guud.....	2
Ujeedada	2
Qadarka Deeqda	2
Maxaa loo adeegsan karaa Maalgelinada?.....	2
Qaybta 2: U qalmitaankaa iyo Ogolaanshaha Hore.....	3
U qalmitaanka	3
Mudnaan siinta	3
Qaybta 3: Sida loo Codso	3
Habraacyada Codsiga	3
Codsiga	3
Qiritaanka	4
Qaybta 4: Ansixinta iyo Lacag Bixinada	4
Dib u eegista Codsiga iyo Ansixinta	4
Helida Lacag bixinta	4
Qaybta 5: Kadib Abaalmarinta	4
Raadraacida Risiityada	4
Qaybta 6: Halka laga heli karo Caawimaad.....	5
Macluumaad Dheeraad ah.....	6
Tusmada A: Su'aalahaa Badanaa la Iswaydiyo.....	7
Tusmada B: Tilmaamaha tallaabo-tallaabada ah ee Codsiga WA Compass.....	9
.....	15
Tusmada C: Tilmaamaha Dib u eegista Risiitka	16

Qaybta 1: Macluumaaadka Guud

Ujeedada

Deeqaha ku salaysan Baahida ayaa la heli karaa si loogu taageero barnaamijyada waxbarashada dhallaanka ee ka qayb qaadanaya Early Achievers si ay uga caawiyaan iibsashada horumarinta manhajka, agabka waxbarashada, qalabyada, waxyaabaha diirada lagu saaro ilmaha socod baradka, horumarinta deegaanka, iyo agabka si loo hormariyo tayada barnaamijka. Kahor inta aadan codsan, fadlan dulmar guud Buugan Deeqda Baahida Ku saleysan si aad u hubiso inaad u qalanto. Barnaamijku wuxuu heli karaa hal deeq oo ku saleysan Baahida sanad maaliyadeedka gobol kasta (Luulyo 1 - Juun 30).

Qadarka Deeqda

Daryeel rixiyaasha ruqsad haysta, la xaqiijiyay, haysta caddeyntra ee ka qayb galaaya Early Achievers ayaa u qalmi kara inay helaan Deeqda Baahida Ku saleysan oo ah \$1,000.

Maxaa loo adeegsan karaa Maalgelinada?

Waxaad maalgelinta u codsan kartaa qaybahaan soo socda:

Qaybaha Kharashaadka

iyarta Jirka ee Firfircoona/Agabka Dhaqdhaqaqa Xubnaha Jirka	Farshaxan, Buugaag	Ciyaarta Caruurta ee Firfircoona	Aaladaha Qiimaynta Horumarka
Horumarinada Deegaanka	Dayactiro yaryar oo lagu sameynaayo Xarunta Daryeelka Ilmaha	Xirfadaha Dhaqdhaqaqa	Taageerooyinka, Qalabyada, ama Adeegyada loogu talagalay Carruurta qaba Baahida
Agabka carruurta yaryar/Qalabka Ilmaha socod baradka ah	Caafimaadka iyo Badqabka	Xisaabta/Tirada, Bay'ada/Saynis ka	Muusikada iyo Dhaqdhaqaqa
Hormarka Xirfada, Badelka Wakhtiga	Hormarinta Aqbalida iyo Kala Duwanaanta	Boonbilayaasha Jilicsan/Barkima ha	Kaydinta/Qaanado si loo kordhiyo helitaanka qalabka
Helitaanka Teknoolajiyada/Interneet si Loogu Xoojiyo Xaadirkiska Elektarooniga ah			

Lacagaha deeqda ah loomaa isticmaali karo:

- Horumarinada waxyaabaha raasumaalka ah, sida dhismo wayn ama dayactir
- Kaararka Hadiyadda
- Kordhinta mushaharka
- Gunoojin noocay doonaan ha aadeene
- Halwo ama ujeedooyin diineed, oo ay kamid yihiin caabudida ama waxbarasho

Fadlan akhri [Tilmaamaha Fulinta Early Achievers Qaybta 8: Taageerooyinka iyo Kabitaankaa](#), si aad u hesho macluumaaad dheeraad ah oo ku saabsan kharashaadka aan la oggolayn.

Qaybta 2: U qalmitaankaa iyo Ogolaanshaha Hore

U qalmitaanka

Ka qaybgalayaasha Early Achievers waa ay u qalmi karaan deeq haddii ay buuxiyaan ugu yaraan mid kamid ah shuruudahan soo socda:

- Haddii ay ka diiwaangashan yihiin barnaamijka Cuntada Waaxda Beeraha Mareykanka (United States Department of Agriculture, USDA) Heerka 1
- Haddii ay ku yaalaan gudaha degmo dugsiyedka u adeega ugu yaraan 20% kamid ah carruurta dakhligoodu hooseeyo iyadoo lagu saleynayo xogta Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada (Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI). Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan in degmo dugsiyedkaagu buuxisay shuruudahan, fadlan ka akhri Su'aalaha Badanaa La iswaydiyo Tusmada A.

Mudnaan siinta

Waaxda Caruurta, Dhalinta, iyo Qoysaska ee Gobalka Washington (The Washington State Department of Children, Youth, and Families, DCYF) waxaa laga yaabaa inay mudnaanta siiso codsiyada ka qaybgalayaasha adeegyada siiya carruurta aan kujirin da'da dugsiga ee hela kaalmada Barnaamijka Kaalmada siiya qoysaska Dakhligoodu hooseeyo (Working Connections Child Care, WCCC) iyadoo loo maraayo qiyaasta boqolkiiba carruurta ka helaysa adeegyada xarunta ama daryeel guri qoys oo shati haysta, iyo kuwa muujiya barnaamij dhaqan kala duwan kajiro.

Qaybta 3: Sida loo Codso

Codsiyada waa in la buuxiyo laguna soo gudbiyo [WA Compass](#). Si aad u hesho tilmaamaha aadna codsiga oga gasho kumbuyutarka ama moobeel, booqo: https://wa-del.my.site.com/PP_LoginPage. Kadib marka aad gasho WA Compass, Riix badhanka "Early Achievers".

Habraacyada Codsiga

Kahor inta aadan codsan, Waa inaad ciwaan ku leedahay Barta WA Compass.

1. Si aad koonto uga sameysato WA Compass ama u cusbooneysiiso baasaweerkaaga, fadlan la xariir dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov ama wac 866-627-8929.
 - a. La xariir cida ku siisay ruqsada, haddii aad u baahan tahay inaad cusbooneysiiso magacaaga, ciwaankaaga, lambarka taleefoonkaaga, iyo/ama ciwaanka iimaylkaaga.
 - b. Ogolaanshaha gelida waxaa la siiyay agaasimaha iyo cida koowaad ee lala xariiraayo. Doorarkaan waxay oggolaadaan oggolaanshaha gelitaanka qof kale oo dheeraad ah.
2. Daryeel bixiyaashu waxay soo gudbiyaan codsi ayadoo isticmaalaya Barta Daryeel Bixiyaha WA Compass.
 - a. Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah iyo sawiro muujinaaya sida loogu soo gudbiyo codsigaaga Barta daryeel Bixiyaha, fadlan eeg Tilmaamaha ku saabsan sida loosoo gudbiyo Codsiyaaga Barta daryeel Bixiyaha ee WA Compass.
 - b. Si aad u billoowdo, gal [Boga Daryeel Bixiyaha ee WA Compass](#), kadib gal Badhanka Early Achievers, dabadeedna Riix badhanka "Bilow Codsiyaaga NBG, Needs-Based Grant, NBG".
 - c. Wuxuu ka jawaabi doontaa su'aalo taxanayaal ah, kadib ku qor magacaaga saxiix ahaan oo soo dir codsiga. Haddii aad dooneyso inaad seyf gareyso codsigaaga aadna hadhow dib ugu soo laabato, Riix badhanka "Seyf garee (Save)" oo ku yaala qaybta kore ama qaybta hoose ee codsiga.

3. Isla marka codsiga la gudbiyo, dib wax loogama badeli karo mana awoodi doontid inaad wax ka badesho. Fadlan si taxadar leh u akhri codsigaaga kahor inta aadan dirin.

Qiritaanka

Marka ay saxeexaan ayna soo diraan codsiga Deeqda ku salaysan Baahida Early Achievers, codsadayaashu waxay aqbalayaan shuruudahaan iyo xeerarkaan soo socda:

1. Waxaad ku kharash garaynaysaa lacagta deeqda kaliya alaabta ku jirta qaybaha kharashka la ogolyahay ee kor ku xusan, iyo hal sano gudaheed markaad lacagta hesho.
2. Waxaad ka ilaalin doontaa dhammaan rasiidhada iibka lagu sameeyay lacagta deeqda ku salaysan baahiyaha muddo todoba sano ah. Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska ayaa laga yaabaa inay ku weyddiiso inaad bixiso rasiidhadan.
3. Haddii aadan bixin karin rasiidhada iyo dukumeentiga marka lagu weydiyo, waa inaad dib u soo celisaa qayb ama dhammaan lacagta deeqda Gobolka Washington.
4. Waxaad ku kharash garayn doontaa lacagta deeqda alaabta ku jirta qaybaha Qorshaha Kharashka ee la ansixiyay hal (1) sano gudahood markaad lacagta hesho.

Qaybta 4: Ansixinta iyo Lacag Bixinada

Dib u eegista Codsga iyo Ansixinta

Codsiyada Deeqda ee Ku saleysan Baahida ayaa **dib loo eegaa** sida ay usoo kala horeeyaan.

Marka codsiga Deeqda Baahida Ku saleysan lagu soo gudbiyo WA Compass, xaalada codsiga waxay iska badelaysaa "cusub" waxayna isku badelaysaa "socda." DCYF waxay eegi doontaa codsiyada lasoo gudbiyay si ay u eegto inay u qalmaan ayna dhameystiran yihiin.

Nidaamka ansixinta guud ahaan wuxuu qaataa 4-6 todobaad. Marka codsiga la ansixiyo loona gudbo lacag bixin, xaalada codsiga ee WA Compass waxay isku badeli doontaa "Waa la aqbalay," waxaana ogeysiis dheeraad ah loo diri doonaa ka qaygalaha. Ogeysiisyada waxaa lagu diraa iimayl.

Helida Lacag bixin

DCYF waxay ka shaqayn doontaa bixinta lacagaha iyada oo loo marayo Nidaamka Bixinta Adeegyada Bulshada (SSPS) muddo dhan 4 ilaa 6 toddobaad gudahood marka la ansixiyo codsiga. Qofka deeqda helaya waxa uu lacagta u heli doonaa isla habka uu hore ugu helo lacagaha SSPS. Fadlan ogsoonow in lacag bixinada soo mara nidaamka elektarooniga ah iyo U.S. Postal Service inay qaadan karaa dhowr maalmood oo ah kuwa shaqada, arrintaan oo sameynaysa xiliga saxda ah ee daryeel bixiyaashu helayaan lacagaha.

Qaybta 5: Kadib Abaalmarinta

Haddii aad hesho Deeqda Baahida Ku saleysan, waa inaad u diyaarsan tahay inaad soo gudbiso risiityada alaabaha iyo kharashaadka aad ku bixisay deeqda lagu siiyay. Marka codsadaha la siiyo lacagaha deeqda ah, dhammaan lacagaha deeqaha ah waa in la isticmaalo hal sano gudaheed oo laga bilaabaayo marka la helay deeqda waana la lagu gato waxyaabaha la oggol yahay oo kaliya.

Raadraacida Risiityada

Daryeel bixiyaashu waa inay kaydiyaan dhammaan risiityada waxyaabaha ay kusoo iibsadeen Deeqda Baahida ku saleysan muddo dhan todobo sano waxaana laga yaabaa inay DCYF ka codsato inay soo gudbiyaan risiityada. Haddii daryeel bixiye uusan awoodin inuu meel dhigo risiityada waxyaabaha uu iibsaday asagoo

isticmaalaaya lacagaha deeqda ah, waxaa laga rabi doonaa inuu qayb ama guud ahaan lacagaha dib ugu celiyo Gobalka Washington

DCYF waxay dooran doontaa tusmo bakhtiya-nasiib ah oo deeq bixiyaal si ay u soo gudbiyaan rasiityada dhammaan waxyabaha ay ku iibsadeen deeqda. Daryeel bixiyaasha rasiityadooda dib loo eegaayo waxaa la ogeysiin doonaa hal-sano kadib marka muddada ay lacagta ku isticmaalayaan xirmato.

DCYF waxay aqoonsataa dhowr qaab oo ay ku eegayso dhammaan rasiityada lacagaha deeqda ah. Hoos waxaa lagu qoran fikrado ku saabsan sida loo bilaabo:

1. **Hayso dhamaan rasiityada.** Qodobkan lama buunbuunin kari. Sameysashada nidaam haboon ood ku kaydsanayso rasiityada wuxuu kuu kaydin karaa wakhti badan haddii aad kamid noqoto dadka rasiityadooda dib loo eegaayo.
2. **Iskaan garee rasiityada oo hayso ugu yaraan todobo sano.** Arrintaan waxay noqonaysaa muhiim haddii khada rasiityada baaba'do. Haddii DCYF aysan akhrin karin rasiitka, ma awoodi doonaan inay aqbalaan marka ay rasiityada dib u eegayaan. DCYF waa ay aqbashaa in rasiityada nidaam elektaroonig ah lagu kaydiyo. Hase yeeshoo, waa fikrad wanaagsan inaad meel hoose ku kaydiso rasiityada maadaama aaladaada kaydka ay halaabi karto.
3. **Rasiitka sawir oga qaad taleefoonkaaga.** Kani waa fikir wanaagsan waxaana jira ablikeeshino aad u fiican oo kaa caawin kara arrintaan. Marka la eego teknoolajiyada maanta jirta, waxaad "kaydin kartaa xogta rasiityada dabadeedna waxaad ka qaadi kartaa sawir." Laakiin xasusnoow inaad kaydsataa faylasha barnaamijka abk.
4. **Ogoloow in rasiityadaada laguugu soo diro iimayl, haddii laguu soo bandhigo.** Kani waa fikir wanaagsan, dad badan oo wax iibiya ayaa kusoo bandhigaaya adeeggaan.
5. **Haku tiirsanaan bayaanka bankiga, bayaanada kaarka lacagta cadaanka ah, ama jeegaga la baajiyay.** Kuwaan waa muhiim, laakiin kuma filna cadeyn haddii aadan hayn rasiityada saxda ah. Diwaanka kaydka sababo la xariira, bayaanada baanka, bayaanada kaarka lacagta caddaanka ah, jeegaga la buriyay waa wax wanaagsan, laakiin xogta lacagaha, ee lagu qoro rasiityada, waxay muhiim u yihiin dib u eegista rasiitka ee DCYF. DCYF waxay arki kartaa bayaanka kaarka lacagta cadaanka ah oo muujinaaya inaad \$435 kala baxday Home Depot, laakiin wax fikrad ah kama haystaan wax saxda ah ee aad gadatay. Waxay noqon kartaa inaad gadatay mashiinka hilibka digaaga lagu shiilo halkii aad ka gadan lahayd biraha lagu kutubo ee lagu iibsan karo deeqda sida ku xusan Xeerka Dadka Naafada ah ee Mareykanka (Americans with Disabilities Act, ADA).
6. **Wax haku gadan Lacag Caddaan ah.** Arrintaan aad ayay muhiim u tahay. Lacagta caddaanka ah waa ay adag tahay in la oggaado, waxaana fudud inay si fudud ku baxdo, waana aad u adag in lagu qoro rasiit. Istimmaal kaararka deynta iyo lacagta caddaanka ah; waxay ku siinayaan bayaano bille ah waa si fudud loona barbardhigi karo rasiityadaada.
7. **Dalbo caawimaad haddii aad u baahan tahay.** Nidaamka dib u eegista rasiitka ujeedadiisu ma ahan in lagaaga bajijo. Fadlan waydii haddii aad qabto wax su'aalo oo ku saabsan noocyada rasiityada iyo dukumiintiyada lagaaga baahan karo. Halkan waxaan u joognaa inaan ku caawino.

Qaybta 6: Halka laga heli karo Caawimaad

- Kaalmada farsamada iyo Helitaanka Luuqada
 - Haddii aad u baahan tahay kaalmo farsamo, oo ay kamid tahay caawimaad aad ku helayso luuqadaada, tilmaamo muujinaaya sida loo diyaariyo loona galoo codsiga, ama haddii aad qabto su'aalo ku saabsan kharash gareynta iyo kaydinta rasiityada/dukumiintiyada, waxaad la xariiri kartaa Tababarahaaga Early Achievers. Haddii aada aqoon qofka tababarahaagu yahay, wac xafiiska deegaankaaga ee Child Care Aware:

Xafiisyada Deegaanka ee Child Care Aware

Child Care Aware ee Eastern WashingtonD	877-965-7109
Child Care Aware ee Eastern Washington	800-446-2229
Child Care Aware ee King County	206-329-1011
Child Care Aware ee Pierce County	253-272-8000
Child Care Aware ee Northwest Washington	360-734-8396
Child Care Aware ee Olympic Peninsula	360-786-8907
Child Care Aware ee Southwest Washington	360-952-3358

- Su'aalaha Codsiga
 - Hadii aad su'aalo ka qabto codsiga, wakhtiga deeqda la bixinayo, ama su'aalo kale oo khaas u ah deeqda, fadlan iimeel u dir dcyf.needsbasedgrants@dcyf.wa.gov.
- Lifaaga Barta Daryeel Bixiyaha WA Compass
 - Si aad u gasho koontadaada, isticmaal lifaaqan lagu galu barta: https://wa-del.my.site.com/PP_LoginPage
- Miyaad geli waysay?
 - Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo gelida koontadaada Barta Daryeel Bixiyaha WA Compass, fadlan iimayl u dir dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov ama wac 866-627-8929.

Macluumaad Dheeraad ah

Fadlan booqo [Bogga webka Deeqda Baahida Ku saleysan ee Early Achievers](#). Bogga webka wuxuu leeyahay lifaaqyo laga helaayo dhammaan ilaha aan heli karno.

Tusmada A: Su'aalaha Badanaa la Iswaydiyo

Su'aal: Mala hubaa in ka qaybgalayaashu helayaan Deeqda Baahida Ku saleysan haddii ay codsdaan ayna u qalmaan?

Jawaab: Maya. Codsiyada Deeqda ee Ku saleysan Baahida waxaa loogu adeeggaa sida ay usoo kala horeeyaan. Marka maalgelinta la dhammeeyo, deeqdu way xirmi doontaa, codsiyada aan helida maalgelinta waxaa dhici doonaa wakhtigooda.

Su'aal: Sidee ka qaybgaluhu ku ogaan karaa haddii uu yahay degmo dugsiyeedk u qalma deeqda?

Jawaab: Degmo dugsiyeedka u qalma waxaa kujira kuwa ay ugu yaraan 20% kamid ah ardayda ay helaan cuntada bilaashka ah ama laga yareeyay qiimaha. Si aad u ogagato in degmo dugsiyeedku u qalmo deeqda, booqo Xogta Dugsiyada Dadweynaha Washington ee Warbixinta U qalmitaanka Deegaanka ood ka helayso websaytka OSPI <https://ospi.k12.wa.us/policy-funding/child-nutrition/child-nutrition-program-reports>. Fadlan ogsoonooow in DCYF isticmaasho tirada boqolkiba degmo dugsiyeedka dhan, ee aysan dugsi si gaar ah u eegin.

Su'aal: Ka qaybgale kasta oo u qalma Early Achievers ma soo dalban karaa Deeqda Baahida ku Saleysan, xitaa haddii uusan la shaqeeyn wakiilka Child Care Aware of Washington?

Jawaab: Haa.

Su'aal: Waxbarashada Dhallaanka iyo Barnaamijka Caawimaada "Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP" ee dariiqa shatiga Early Achievers ma codsan karaa deeq?

Jawaab: Haa.

Su'aal: Ka qaybgale ka codsan karaa Deeqda Baahida Ku saleysan, xataa haddii uusan u adeegin carruur hel kaalmo?

Jawaab: Haa.

Su'aal: Deeqda ma loo isticmaali kara in lacag loogu celiyo ka qaygalaha qalab uu horay u soo iibsaday?

Jawaab: Maya, maalgelintaan waxa kaliya oo loo isticmaali karaa alaabaha lagu xusay codsiga deeqda ku salaysan baahiya marka deeqda la oggolaado oo lacagaha uu helo daryeel bixiyaha.

Su'aal: Ka qaybgaluhu ma codsan kara wax ka badan cadadka lacagta la oggol yahay?

Jawaab: Maya. Cadadka Deeqda Baahida ku saleysan waa \$1,000 oo ay helayaan dhammaan bixiyaaha hela deeqda. Deeq laguma bixin karo lacag ka badan \$1,000.

Su'aal: Mala qiimeyn karaa xarun mana heli kartaa Deeqda Baahida ku saleysan?

Jawaab: Haa, xarunta Heerkeeda tayada ee kama dambeysta ah yahay 2, 3, 3+, 4, ama 5 waxay codsan kartaa Deeqda Baahida Ku saleysan.

Su'aal: Muddo intee le'eg ayay tahay inay cidda heshay deeqda ku isticmaasho?

Jawaab: Sida lagu xusay Shuruudaha iyo Xeerarka, lacagaha Deeqda Baahida ku saleysan waa in lagu kharash kareeyo ku iibsashada waxyaabaha la oggol yahay muddo hal sano gudaheed ah oo laga bilaabaayo goorta la helay lacagta.

Su'aal: Daryeel bixiyaashu miyay u baahan yihiin inay meel ku kaydsadaan rasiityada?

Jawaab: Haa. Sida lagu xusay Shuruudaha iyo Xeerarka Codsiiga Deeqaha Ku Salaysan Baahida, xarunta qaataha deeqda waa inay kaydisaa dhammaan rasiityada dukumiintiyada la xiriira lacagaha deeqda ah todoba sano waa inay ogolaato in ay siiso rasiityada iyo dukumiintiyada DCYF mid kasta/dhammaan alaabta la soo iibsaday ee loo adeegsaday deeqdaan, marka laga codsado. Ku guuldarreysiga fulinta shuruudahaan waxaa ka dhalan doono in xarunta qayb ama dhammaan bixiso oo ay dib lacagta ugu celiso DCYF. Si aad u hesho

macluumaaad dheeraad ah oo ku saabsan si loogu gudbiyo risiityada Deeqda Baahida ku Saleysan DCYF, fadlan eeg Tilmaamaha Dib u eegista Risiitka ee Deeqda Baahida Ku Saleysan ee ku qoran Tusmada C.

Su'aal: Daryeel bixiyuhu ma heli karaa Deeqda Ku saleeysan Baahida wax hal mar ka badan?

Jawaab: Barnaamijka u qalma wuxuu codsan karaa Deeqda Baahida ku Saleysan hal mar halkii sanadba (Luulyo 1 - Juun 30).

Su'aal: Maxuu ka qaybgalahu filan karaa kadib markii Deeqda Baahida ku Saleeysan la gudbiyo?

Jawaab: Marka codsiga Deeqda Baahida Ku saleysan lagu soo gudbiyo WA Compass, xaalada codsiga waxay iska badelaysaa "cusub" waxayna isku badelaysaa "socda." DCYF waxay eegi doontaa codsiyada lasoo gudbiyay si ay u eegto inay u qalmaan ayna dhameystiran yihiin.

Codsiyada la dhameystiray waxaa loo gudbiyaa ansixinta iyo lacag bixinta. Guud ahaan, howshaan waxay qaadataa 4-6 toddobaad. Marka codsiga la ansixiyo loona gudbo lacag bixinta, xaalada codsiga waxay isku badeli doontaa "Waa la aqbalay," waxaana ogeysiis dheeraad ah loo diri doonaa ka qaybgalaha. Ogeysiisyada waxaa lagu diraa iimayl.

Su'aal: Yaan la xariiraya haddii aan qabo su'aalo?

Jawaab: Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan u qalmitaankaa/sida loo adeegsado deeqda, iimay u dir dcyf.needsbasedgrants@dcyf.wa.gov.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan galitaanka WA Compass, iimayl u dir dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov.

Tusmada B: Tilmaamaha tallaabo-tallaabada ah ee Codsiga WA Compass.

Si aad U Buuxiso Codsiga Deeqda Baahida Ku Salaysan ee Barta Bixiyaha, Wawa aad Raacdaa Talaabooyinka Soo Socda

1. Gal Barta Bixiyaha ee WA Compass

2. Riix badhanka “Early Achievers”:



3. Riix badhanka Deeqda Baahida Ku Saleysan Kadibna riix badhanka “Billoow Codsiga NBG (Start NBG Application)” ku yaala xagga hoose si aad u bilawdo:

A screenshot of a web page titled "Needs Based Grant". The header includes a "Home" link and the title "Needs Based Grant". Below the title is a section titled "Instructions/Instrucciones/Tilmaamaha". It contains a message: "Congratulations! You are eligible to apply for an Early Achievers Needs-Based Grant. Needs-Based Grants are available to support Early Achievers participants with purchasing curriculum development and instructional materials, supplies and equipment to improve program quality." It also states: "You may be eligible to receive a Needs-Based Grant of \$1,000." Below this is a Spanish translation: "¡Felicitaciones! Usted tiene derecho de solicitar la subvención basada en las necesidades de Early Achievers. Las subvenciones basadas en las necesidades están disponibles para apoyar a los participantes de Early Achievers en la compra de materiales para el desarrollo curricular y didácticos, útiles y equipamiento para la mejora de calidad de su programa." Further down, there is a note in English: "Usted puede ser elegible para recibir una subvención basada en las necesidades de \$1,000." Another note in Spanish: "Hambalyof Waaad u qalataas inaad codsato Deeqda Baahida Ku Saleysan ee Early Achievers. Deeqaha Baahida Ku Saleysan waxaa loo heli karaa si loogu taageero ka qaybqayaaasha barnaamijka Early Achievers in ay ibsadaan agabka horumartina manhajka, qalabka waxbaridda, alaabada iyo agabka kale si loo kordhiyo tayada barnaamijka. Waxaa laga yaabaa inaad u qalato inaad hesho Deeq Baahida Ku Saleysan oo ah \$1,000." Instructions for starting the application: "To begin the application process, please click the green "Start NBG Application" button below. Para iniciar el proceso de solicitud, haga clic en el botón verde « Start NBG Application » a continuación: Si aad u bilowid habka codsiga, fadlan guji badhanka cagtaan ee hoos ku yaal oo leh "Start NBG Application". A green button labeled "Start NBG Application" is visible at the bottom. At the very bottom, there is a copyright notice: "Copyright Washington State Department of Children, Youth, and Families | For Provider Portal Support: govproc@dcyf.wa.gov or call 866-627-8929".

4. Akhri Tilmaamaha iyo Sharaxaada qaybta boga Macluumaadka Bixiyaha:

A screenshot of a web-based application form titled "Application for Early Achievers Needs-Based Grant". The form has a purple header and a white body. At the top right are buttons for "< Previous", "Save", "Next >", and "View & Download PDF". On the left, a sidebar lists questions with their respective answer boxes: 1. Macluumaadka Bixiyaha (0/2 Waa la dhameeyay), 2. U Qalmida, 3. Kala hormarinta (0/1 Waa la dhameeyay), 4. Kharash Qorshaha (0/1 Waa la dhameeyay), 5. Saxeexa (0/3 Waa la dhameeyay), and a "Submit" button. The main content area shows the first question: "1. Macluumaadka Bixiyaha - (0/2 Waa la rabaa in la dhameeyo) (Su'aalaha leh xiddig waa qasab in la buuxiyo)". Below it is a detailed description of the grant: "Deeq-Baahiyaha Ku-saleysan waxay taageertaa barnaamijada waxbarashada hore ee ka qaybqaadanaya Early Achievers si ay uga caawiso ilbarsada horumartina manhajka, agabka wax barida, saadka, hagaejintaa ilmaha iyo socod barafka, qalabka, iyo horumartina deegaanka si kor loogu qaado tayada barnaamijka. Kahor intaanad codsan, fadlan si flican dib u eeg Guudmarka Deeqaha Ku Salaysan Baahida si aad u hubiso inaad u qalato. Barnaamijku waxa uu heli karaa Deeqaha ku salaysan Baahiyaha hal mar sanad xisaabeedka (Julayy 1 - Juun 30). Si aad u codsato Deeq-Baahiyaha Ku Salaysan, fadlan buuxi codsigan oo dhan." At the bottom of the form is a section titled "Heerka Ka Qaybqaadashada Early Achievers".

< Previous Save Next >

View & Download PDF

Heerka Ka Qaybqaadashada Early Achievers

Xaaladda Early Achievers ee Ugu
Dambeysay
Level 3
Current Early Achievers Status

1. Macluumaadka Bixiyaha

Lambarka Aqoonsiga Bixiyaha Shatiga u haysta DCYF 1013364	Ganacsiga Sharicga ah / Magaca Xarunta Hussein Shamso M	Lambarka iibiyaha gobolka oo dhan (tusale SWV0123456-00) SWV0209353
Nambarka SWV	ee Xarunta Kent, WA 98030	Cinwaanka Xarunta AVE SE, Kent, WA 98030
Milkiilaha Xarunta / Magaca Shatiga	Vinidha Koweed oo Hadda	* Goobta Codsiga oo Magaca Vinidha
* Meesha Lagala Xidhiidhayo Ciwaanka limaylka	Meesha Lagala Xidhiidhayo Nambarka Taleefanka	Nooca Barnaamijka Family Child Care Home

5. Buuxi qaybta Xogta Bixiyaha. Meel kasta oo leh calaamada * waa in la buuxiyo si loo dhameystiro qaybtaan:

6. Riix "Save (Kaydi)" oo kadibna riix "Next (Midka Xiga)"

Application for Early Achievers Needs-Based Grant

< Previous Save Next >

View & Download PDF

1. Macluumaadka Bixiyaha
(0/2 Waa la dhameeyay)

2. U Qalmida

1. Macluumaadka Bixiyaha - (0/2 Waa la rabaa in la dhameeyo)
(Su'aalaha leh xiddig waa qasab in la buuxiyo*)

7. Marka tan la buuxiyo, waxaa soo qormaysa xaalad dhamaystir; waxaad markaa kadib u gudbaysaa qaybta u Qalmitaanka ee codsiga:

Application for Early Achievers Needs-Based Grant

< Previous Save Next >

View & Download PDF

1. Macluumaadka Bixiyaha
(2/2 Waa la dhameeyay)

2. U Qalmida

3. Kala hormarinta
(0/1 Waa la dhameeyay)

4. Kharash Oorshaha

1. Macluumaadka Bixiyaha - (2/2 Waa la rabaa in la dhameeyo)
(Su'aalaha leh xiddig waa qasab in la buuxiyo*)

Tilmaamaha & Sharaxaada

Deeqda-Baahiyaha Ku-saleysan waxay taageertaa barnaamijyada waxbarashada hore ee ka qaybqaadanaya Early Achievers si ay uga caawiso ilhsashada horumarinta manbaalka_anabka_wax_harida_saadka_baaqaliinta_ilmaha_ivo_socod_haradka_nalabka_ivo_horumarinta_deenoanka_si_kor

8. Buuxi Qaybta U qalmida; haddii ay ka diiwaangashan yihin barnaamijka Cuntada Waaxda Beeraha Mareykanka (United States Department of Agriculture, USDA) Qaybta 1 aad, Haa ku ku qor bokiska la calaamadeeyo

Application for Early Achievers Needs-Based Grant

< Previous Save Next > View & Download PDF

1. Macluumaadka Bixiyaha (2/2 Waa la dhameeyay)

2. U Qalmida

Xarunta/Goobta waa inay ka qaybqaadataa Early Achievers heerka 2 ama heerka 2-5 la qiimeeyay oo ay la kulmaan shayga A ama B, si ay xaq ugu yeeshaan Deeqaha Ku Salaysan Baahida.

A. Xaruntu ma ku taal degmo dugsiyeed u adeegta ugu yaraan 20% carruuta dakhligoodu hooseeyo?

Fiiro gaar ah: Haddii degmo dugsiyeed hore ugu jirtay xarunta/goobta, markaas waxay ka muuqan doontaa halkan hoose. Haddii loo baahdo wax cusub ama aanay jirin dugsi degmadu, markaas fadian ku bixi magaca degmada dugsiga goobta kale ee hoos

Degmada Dugsiga
Kent School District (48% low income served)

Degmo Dugsiyeedka (haddii loo baahdo cusbooneysiin)

AMA

B. Barnaamiju ma ka diwaan gashan yahay Tier 1 USDA Program?

Hubi Haa

9. Riix "Save (Kaydi)" oo kadibna riix "Next (Midka Xiga)"

< Previous Save Next > View & Download PDF

1. Macluumaadka Bixiyaha (2/2 Waa la dhameeyay)

2. U Qalmida

Xarunta/Goobta waa inay ka qaybqaadataa Early Achievers heerka 2 ama heerka 2-5 la qiimeeyay oo ay la kulmaan shayga A ama B, si ay xaq ugu yeeshaan Deeqaha Ku Salaysan Baahida.

10. Marka tan la buuxiyo, waxaad markaa kadib u gudbaysaa qaybta Mudnaysiinta ee codsiga:

Application for Early Achievers Needs-Based Grant

< Previous Save Next > View & Download PDF

1. Macluumaadka Bixiyaha (2/2 Waa la dhameeyay)

2. U Qalmida

3. Kala hormarinta - (0/1 Waa la rabaa in la dhameeyo)
(Su'aalahe leh xiddig waa qasab in la buuxiyo)

Macluumaadka Kaalmada WCCC

Hubi haddii xaruntaada/goobtaadu u adeegto carruuta aan da'da dugsiga ahayn ee helaya kaalmooyinka Daryeelka Carruuta ee Xiriirinta Shaqada (WCCC)	Waa imisa qiyaasta boqolkiiba carruuta ku jirta xarunta/daryeelka goobta ee helaya kaalmada WCCC? --None--
--	--

Submit

- 11.** Buuxi qaybta Mudnaysiinta. Tallo caawimaad leh: haddii aad haysato tilmaamo ku qoran hal luuqad ka badan ama asalka cid gaar ah loo adeegaayo, waxaad Riixi kartaa wax ka badan hal doorasho:

Application for Early Achievers Needs-Based Grant

1. Macluumaadka Bixiyaha
(2/2 Waa la dhameeyay)

2. U Qalmida

3. Kala hormarinta - (0/1 Was la rabaa in la dhameeyo)
(Su'aalaha leh xiddig waa qasab in la buuxiyo*)

Macluumaadka Kaalmada WCCC

Hubi haddii xaruntaada/goobtaadu u adeegto carruuta aan da'da dugsiga ahayn ee helaya kaalmooyinka Daryeelka Carurta ee Xiririnta Shaqada (WCCC)

Waa imisa qyaasta boqolkiiba carruuta ku jirta xarunta/daryeelka goobta ee helaya kaalmaadka WCCC? None

Luuqaddee ayaad adeegyada ku bixisaa?

Luqadaha Waxbarashada ka beddel English Chinese-Mandarin Russian Somali Spanish

Luqadaha Waxbarashada - Waxkuwo kale

View & Download PDF

< Previous Save Next >

Submit

- 12.** Riix "Save (Kaydi)" oo kadibna riix "Next (Midka Xiga)"

Application for Early Achievers Needs-Based Grant

1. Macluumaadka Bixiyaha
(2/2 Waa la dhameeyay)

2. U Qalmida

3. Kala hormarinta - (1/1 Was la dhameeyay)

Macluumaadka Kaalmada WCCC

Hubi haddii xaruntaada/goobtaadu u adeegto carruuta aan da'da

Waa imisa qyaasta boqolkiiba carruuta ku jirta xarunta/daryeelka goobta ee

View & Download PDF

< Previous Save Next >

- 13.** Marka tan la buuxiyo, waxaa soo qormaysa xaalad dhamaystir; waxaad markaa kadib u gudbaysaa qaybta Kharashka Kharash gareynta Lacagta (Spend Plan) ee codsiga:

Application for Early Achievers Needs-Based Grant

1. Macluumaadka Bixiyaha
(2/2 Waa la dhameeyay)

2. U Qalmida

3. Kala hormarinta - (1/1 Was la dhameeyay)

4. Kharash Qorshaha - (0/1 Was la rabaa in la dhameeyo)
(Su'aalaha leh xiddig waa qasab in la buuxiyo*)

Kharash Tilmaamaha Qorshaha

Deeqda Baahida Ku Salaysan waa \$1,000.00.

Fadijan u qilmeen xaruntaada dhinacyada horumarinta (waxaa laga yaabaa inaad si shuraako ah ula shaqeyso wakiliikaaga Child Care Aware of Washington).

Adigdo isticmaalaya qilmaytaada, xaggee ayaad u qorshaysan tahay inaad u isticmaasho deeqqahe goobta ku salaysan baahiyaha si aad u horumariso tayada?

Calaamadee dhammaan kuwa khuseeya.

* Kharash qaybta Qorshaha

Fadijan dooro ugu yaraan hal qayb Kharash ka hor inta aanad u dhaqaaqin qaybta xigta.

Bixi Qaybahaa

Ciyaarta Jireed ee Firfircoo Farshaxan, Buugaagta Aladaha Baarista Korriinka Ciyaar Riwaiyad Leh

View & Download PDF

< Previous Save Next >

Submit

14. Dooro qayb kasta ee aad dooneyso inaad ku kharash gareyso lacagta Deeqda Baahida Ku Saleysan.

Bixi Qaybaha

Ciyaarta Jireed ee Fir fircoor <input checked="" type="checkbox"/>	Farshaxan, Buugaagta <input type="checkbox"/>	Aaladaha Baarista Korriinka <input type="checkbox"/>	Ciyaar Riwaayad Leh <input checked="" type="checkbox"/>
Hagaajinta Deegaanka <input type="checkbox"/>	Matoor Fican <input type="checkbox"/>	Alaabta Dhallaanka/Sannaqaadka Diirada-saar <input checked="" type="checkbox"/>	Caafimaadka iyo Badbaadada <input type="checkbox"/>
Xisaab/Tirooyinka, Dabeecada/Saynsika <input type="checkbox"/>	Dib-u-habayn yar oo lagu sameeyo Xarunta Xannaanada Carruurta <input type="checkbox"/>	Muusiga iyo Dhaqdaqaaqa <input type="checkbox"/>	Horumarinta Xirfadlaha/Wakhtiga Bedelka <input type="checkbox"/>
Horumarinta Aqbalaada iyo Kala Duwanaanshaha <input checked="" type="checkbox"/>	Alaabta/Barkimooyinka Jilicsan <input type="checkbox"/>	Kaydinta/Khaladaynta Alaabta Helitaanka <input type="checkbox"/>	Taageerada Imaanshaha Elektrooniiga ah <input type="checkbox"/>
Taageerada Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba <input type="checkbox"/>			

15. Riix "Save (Kaydi)" oo ka dibna riix "Next (Midka Xiga)"


Bixi Qaybaha

16. Dhameystir qaybta saxeexa adoo ku qoraaya magacaaga dabadeedna taariikhda Saxiixa.

Application for Early Achievers Needs-Based Grant

1. Macluumaadka Bixiyaha (2/2 Waa la dhameeyay)	< Previous	Save	Next >	View & Download PDF
2. U Qalmida				
3. Kala hormarinta (1/1 Waa la dhameeyay)				
4. Kharash Qorshaha (0/1 Waa la dhameeyay)				
5. Saxeexa (0/3 Waa la dhameeyay)	<p>5. Saxeexa - (0/3 Waa la rabaa in la dhameeyo) (Su'aalaha leh xiddig waa qasab in la buuxiyo*)</p> <p>Shuruudaha iyo Shuruudaha</p> <p>Markaad saxiido codsigan, adiga (xarunta Early Achievers ee ku magacaaban arjigan) waxaad ogolaatay kuwa soo socda:</p> <ol style="list-style-type: none"> 1. Waaad ku kharash garaynaysaa lacagta deeqda kaliya alaabta ku jirta qaybaha kharashka la ogolyahay ee kor ku xusan, iyo hal sano qudaheed markaad lacagta hesho. 2. Waaad ka ilaalin doontaa dhammaan rasiihdada iibka lagu sameeyay lacagta deeqda ku salaysan baahiyaha muddo todoba sano ah. Waaadha Carrurta, Dhallinyaraada, iyo Qoysaska ayaa laga yaabaa inay ku weyddiso inaad bixiso rasiihadan. 3. Haddii aadan bixin karin rasiihdada iyo dukumeentiga marka lagu weydiyo, waa inaad dib u soo celisaa qayb ama dhammaan lacagta deeqda Gobolka Washington. 4. Waaad ku kharash garayn dr... nda alaabta ku jirta qaybaha Qorshaha Kharashka ee la ansixiyay hal (1) sano gudahood markaad lacagta hesi. <p>* Magaca Saxeexa Codsadaha Magaca Bixiyaha Hussein Shamso M</p> <p>* Taariikhda Saxeexa mm/dd/yyyy</p>			
Submit				

17. Riix "Riix Sanduuqa Saxeexa si aad saxeexa elektarooniga ah ugu darto. Riix "Kaydi Saxeexa (Save Signature)".



18. Marka tan la buuxiyo, waxaa soo qormaysa xaalad dhamaystir; waxaad markaa kadib u gudbaysaa qabta gudbinta ee codsiga. Riix badhanka "Gudbi (Submit)".

Application for Early Achievers Needs-Based Grant

< Previous Save Next > View & Download PDF

Submit

The submit button will appear below once you have completed the required information on the Needs-Based Grant application.

Applicants must complete the entire application. Incomplete applications will not be accepted, so please ensure there are no areas left blank or incomplete. If you do not have an active Statewide Vendor Payee (SWV) number, you must also complete the W-9 form and the Washington Statewide Vendor Payee form.

Upon receiving Needs-Based Grant application forms, DCYF performs a quality check to ensure the forms are filled out completely. A notification of receipt is then sent to the participant. If the forms are incomplete, the participant will be notified with instructions on resubmitting.

Completed forms are processed for approval and payment. Generally this process takes 4-6 weeks. If there are issues with a Statewide Vendor Identification number or other fiscal documents, the participant is contacted during this time as well.

Once the forms are processed for payment, an additional notification is sent to the participant. Notifications are typically sent by email (when possible).

Whom can I contact if I have questions about eligibility or spending?
A participant can email DCYF at needs.basedGrants@dcyf.wa.gov.

Submit Form

Submit

Foomkaaga wuu diyaar u yahay in la gudbiyo! Fadlan hubi in dhammaan xogtaada ay sax tahay ka hor intaadan gudbin.

19. Waxaa soo boodi doonaa fariin si aad u xaqijiso inaad dooneyo inaad dirto. Riix "Gudbi (Submit)"

Ants must complete the entire application. Incomplete applications will not be accepted, so please ensure complete

vide

rece

ceipt i

ected

ication

Submit Form

Ma hubtaa inaad rabto inaad foomkan gudbiso?

Cancel Submit

Hadii codsiga si sax ah loo gudbiyay, waxaad arki doontaa shaashadan:

Application for Early Achievers Needs-Based Grant

Hambalyo! Si guul leh ayaad u gudbisay foomkan.

[View & Download PDF](#)

Fadlan ogaw: Nuqul PDF oo ah codsiga ayaa la heli karaa.

Application for Early Achievers Needs-Based Grant

Hambalyo! Si guul leh ayaad u gudbisay foomkan.

[View & Download PDF](#)

Tusmada C: Tilmaamaha Dib u eegista Risiitka

Guudmar

Waaxda Gobolka Washington ee Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (Washington State Department of Children, Youth, and Families, DCYF) ayaa dooran doonta tusaale bakhiya-nasiib ah oo ah bixiyaasha daryeelka ilmaha ("deeq helayaasha") helay Deeqaha Baahida Ku-saleysan ee Early Achievers si risiityadooda loogu sameeyo dib u eegis ka dib markay 12 bilood wakhtiga ah dhamaato. DCYF waxay dib u eegtaa rasiityada si ay u muujiso si loo ogaado lacagaha deeqda loo kharash gareeyay - waa wax uu oga baahan yahay Gobolka in DCYF ay fahanto oo ay xaqijiso in deeq bixiyaashu ay ku bixiyeen lacagaha ay heleen waxyaabaha la oggol yahay.

Hawshaan looguma talagalay inay ku baqdin geliso, waxaana halkaan u joogaa inaan ku caawino!

Waxa la filan karo haddii laguu doorto in Risiityadaada Dib u eegis lagu sameeyo

DCYF waxay warqado ogeysiis ah u diri doontaa deeq helayaasha ay dooratay marka loo dhamaado wakhtiga xiliga deeqdu ku egtahay.

Haddii laguu doorto in risiityadaada dib u eegis lagu sameeyo, waxaad warqad ka socota DCYF ku heli doontaa boosto. Ha welwel! Hawshaan looguma talagalin inay kaa cabsiyo. Marka aad hesho warqadaada, waxaad heli doontaa nuqulka qorshaha meelaha lacagta ku kharash gareysay, foomka caddeynta risiitka oo la buuxinaayo, liiska su'aalaha badanaa la iswaydiyo.

Waxaad buuxin doontaa foomka cadeynta risiitka si aad u muujiso inaad lacagaha ku kharash gareysay qaybaha alaabaha la oggol yahay, waxaadna dib ugu diri doontaa DCYF adoo raacinaaya nuqulka risiityadaada. Waxaad ku diri kartaa iimayl ama U.S. Postal Service.

Dhammaan waraaqaha ogeysiiska waxay lahaan doonaan taariikh 30 maalmood ah kama dambeys ah. Haddii aad u baahan tahay wakhti dheeraad ah, waxaad iimaylka ku codsan kartaa wakhti dheeraad ah.

Sidoo kale warqadaha ogaysiiska haddii daryeel bixiye uusan soo dirin dukumiintiga aan u baahanahay, waxaa laga yaabaa inay dib u bixiyaan qayb ama dhammaan lacagaha Deeqda Ku saleysan Baahida ee Early Achievers.

DCYF waxay halkaan u joogtaa inay ku caawiso inta lagu jiro hawsha dib u eegista risiitka. Fadlan noo sheeg haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo gudbinta risiityadaada ama haddii wakhtiga kama dambeysta ah kugu yar yahay. Haddii DCYF qabto wax su'aalo ah ama haddii xog maqan jirto ama risiityo kaa maqan yihiin, waxaan kugula soo xariiri doonaa iimayl si aan kaaga dalbano macluumaad dheeraad ah. Halkan waxaan u joognaa inaan ku caawino!

Haddii aad qabto su'aalo, waan kusoo dhaweyneynaa ee noosoo dir iimayl. Tababarahaaga Child Care Aware ayaa sidoo kale kuu jooga si uu oga jawaabo su'aalahaaga ku saabsan gudbinta risiityada ama buuxinta foomka caddeynta.

Tilmaamo caawimaad leh oo ku saabsan sida loo Diyaariyo Dib u eegista Risiitka

Marka aad isticmaalayso Lacagaha Deeqaha Baahida Ku saleysan ee Early Achievers, ku kaydi risiityadaada boqshadaha waraaqaha, gal kujira kumbuyuutarkaaga, ama iimaykaaga. Haddii aad isku meel ku kaydiso dhamaman risiityadaada, waxaa fududaan doona inaad hesho hadhow.

Halkaan waxaa ku qoran macluumaadka aan oga baahan doono dukumiinti kasta ood soo dirto:

Risiityada

Dhammaan risiityada waa inay muujiyaan dhammaan alaabaha lagu gaday lacagta deeqda ah, qiimaha shey kasta, iyo taariikhda la gaday.

Haddii dhammaan alaabahaaga aadan ku gadan lacagaha deeqda ah, calaamadee alaabaha aadan ku gadan lacagaha deeqda ah si ay u fududaato in la oggaado. Waa ay adag tahay in la oggaado alaabaha lagu gaday lacagaha deeqda ah iyo kuwa aan lagu gadin marka ay sanad kaasoo wareeegato.

DCYF ma aqbasho rasiidhada gacanta lagu qoray ee la xiriira alaabada tafaariiqda, ama rasiidhada ka yimid iibyo gaar ah oo qof ilaa qof ah. Tani waxa ay ku jirtaa, laakiin kuma eko, rasiidhada laga helo iibka guryaha (garage sales), Facebook Marketplace, OfferUp, ama barnaamijyada kale ee online-ka ah ee lagu sameeyo iibka noocaas ah.

Qaansheegadka oo wata Cadeynta Bixinta Lacagta

Qaansheegadka ayaa lasoo gudbin kartaa marka la eego qaar kamid ah iibabka, sida shaqo uu qabtay qandaraasle.

Waraaqaha qaansheegadka waa inay ku qoran yihiin dhamaan alaabaha la iibsaday.

Cadeynta lacag bixinta ayaa noqon kartaa risiitka lacag bixinta, nuqulka jeega la joojiyay*, bayaan banki oo muujinaaya lacag la wareejiyay*.

*Haddii aad soo gudbinayso nuqulka jeeg ama bayaan bangi, lacagta ku qoran waa inay isla haadaan tan ku qoran qaansheegta.

Raadraacida Kharashaadka

Ku qor meelaha aad lacagta ku kharash gareyso buug xasuuseed ama warqad - marka aad wax ku gadato lacagaha Deeqaha Baahida Ku saleysan ee Early Achievers, qor magaca cida aad wax ka iibstay, sheyaasha aad iibsatay, qaybaha la oggol yahay, cadadka lacagta aad ku kharash gareysay. Si aad u hesho liiska buuxa ee qaybaha alaabaha la oggol yahay, fadlan eeg codsigaaga deeqda. Tusaale ahaan:

Magaca Cida aad wax ka iibsatay	Sheyga(shey'yaasha)	Qaybta	Tirada
Costco	Lysol wipes		
	Saabuunta wax lagu dhaqo	Agabka Nadaafada	\$10
	Xaashida wax la iskaga tirtiro	Agabka Nadaafada	\$30
		Agabka Nadaafada	\$20

Lakeshore	Bouncy Balls Quiet Corner	Xirfadaha Dhaqdhaqaqa Waxay taageeraan Carruurta qaba Baahida Gaarka ah	\$50 \$890
------------------	------------------------------	---	---------------

Foomamka Cadeynta

Marka aad risiityadaada u dirto DCYF, sidoo kale waxaa sidoo kale lagaa doonayaan inaad noosoo dirto foomka caddeynta oo soo koobaya alaabaha aad gadatay. Wuxuu doontaa inaad buuxiso foomkaan ood ku qorto xogta dhammaan alaabaha aad gadatay. Magaca qaybta ee ku taala qaybta Kore ee foomka WAA in la buuxiyo, haddii kale DCYF ma aqbali doonto. Sidaan ayay u muuqataa:

Facility/site name:

Licensed Provider ID number:

Name of point of contact:

Point of contact email address:

Phone number:

Sidoo kale daryeel bixiyaashu waa inay cadadka guud ku qoraan qaybta hoose ee foomka. Cadadka guud ee lacagta waa inay la mid tahay dhammaan qiimayaasha alaabaha ku qoran foomkaaga. Qaybta cadadka guue ee foomka waxaa laga helaysaa bogga 2aad. Halkaan ayaad ka helaysaa Sida ayay u muuqato:

--	--	--	--

Total Spent: \$ _____

*Grant Categories:
- Active Play/Gross Motor Materials
Art Books

Waxaa jira labo qaab ood ku qori karto alaabaha aad iibsatay marka aad ku qorayso foomka caddeynta:

Liis garee Dhammaan Qiimayaasha alaabaha oo gaargaar ah

Haddii risiityadaadu ku jiraan alaabaha aad ku gadatay lacagta Deeqaha Baahida Ku Saleysan, laakiin sidoo kale kujiraan waxyaabo aad si gaar ah u gadatay, waa inaad alaabaha si gaar ah ku qorto risiityada. Foomka caddeynta ee leh qiimayaasha alaabaha ee la kala dhigdhigay wuxuu u muuqan doonaa sidaan soo socota:

Vendor Receipt	Items Included	Categories*	A A <input type="checkbox"/> <input checked="" type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> ... Cost
Amazon	Books Fidget Toys	Books Fine Motor	\$6.53 \$6.55

Daryeel bixiyaashu waxay ku dari karaan canshuurta alaabaha gaarka ah, laakiin uma qori karaan cadadka guud ee canshuurta sida kharash gaar ah.

Liisto ku Qor Qiimaha Risiit kasta

Haddii dhamaan alaabaha ku qoran risiitka aad ku gadatay lacagaha deeqda ah risiitkuna uusan lahayn alaaboo aad si gaar ah u gadatay, waxaad ku qori kartaa hal risiit cadadka guud foomkaaga xaqqijinta:

Vendor Receipt	Items Included	Categories*	A A <input type="checkbox"/> <input checked="" type="checkbox"/> <input type="checkbox"/> ... Cost
Amazon	Books and Fidget Toys	Books and Fine Motor	\$13.08 \$13.08 x

Tani waxaa la oggol yahay kaliya haddii dhamaan shey kasta oo ku qoran risiitka aad ku gadatay lacagta deeqda ah. Haddii shey uun kamid ah risiitka aadan ku gadan lacagta deeqda ah, dhamaan qiimayaasha alaabaha waa in mid walba si gaar ah loo qoro.

Waxyabaha ay kaga Duwan tahay kuwii Hore

Sanadkii hore, DCYF waxay ka doonaysaa daryeel bixiyaasha inay qoraan *isla* alaabaha ay doonayaan inay ku iibsadaan deeqda waana inay ku qoraan qorshahooda kharash gareynta. Haddii daryeel bixiyaashu iibsadaan alaaboo kale, waxay u baahan doonaan inay codsadaan mid cusub.

Maadaama codsigii ugu dambeeyay ee Deeqda Baahida Ku saleysan ee Early Achievers uu kaliya uga baahan yahay bixiyaasha inay calaamadeeyay bokisyada qaybaha alaabaha ay ku gadan doonaan lacagaha deeqda ah, DCYF waxay aqbali doontaa rasiityada mid ka mid ah qaybaha kharash bixinta la oggol yahay ee bilaabmaya dayrtaa 2024.

Dib u eegista risiityada ee sanadkii hore waxay wali u baahan doonaan qorshooyinka kharash gareynta ee wax laga badelay.

Su'aalaha badanaa la iswaydiyo ee Dib u eegista Risiitka

Sidee u diraa risiityadayda haddii la doorto in dib u eegis lagu sameeyo risiityadayda?

Waad iskaan garayn kartaa waxaadna iimeel ahaan ugu soo diri kartaa DCYF. Sidoo kale waxaad nuqulka risiityadaada ku diri kartaa boosto (fadlan hasoo dirin risiityada rasmiga ah - ku hayso diwaankaaga). Sidoo kale waxaad ka qaadi kartaa sawir risiitka haddiiba si fudud loo akhrin karo ayna leeyihii magaca cidda aad wax ka iibsatay, qiimaha sheyga, iyo taariikhda aad iibsatay.

Haddii aad risiityadaada iimayl kusoo dirayso, fadlan kusoo dir: dcyf.needsbasedgrants@dcyf.wa.gov

Haddii aad risiityadaada boosto kusoo dirayso, fadlan kusoo dir ciwaankaan:

Washington State Department of Children, Youth, and Families
ATTN: Needs-Based Grant Office
P.O. Box 40970
Olympia, WA 98504-0970

Miyaan diri karaa rasiidhada wixii aan iibsaday ka hor intaanan helin deeqda?

Maya, rasiid kasta oo meteleya waxa aad iibstay ka hor taariikhda deeqda aad heshay lama aqbali doono. Sida lagu xusay Buugga Deeqda Baahida Ku saleysan, Deeqda Baahida Ku saleysan looma isticmaali karo in lacag loogu celiyo bixiyaasha alaaboo ay horey u iibsadeen.

Kawaran haddii aanan wali waxba ku gadan lacagaha deeqda ah marka aan helo warqada dib u eegista risiitkaya?

Qof kasta oo helay deeq waxaa laga filayaa inuu ku isticmaalo lacagta sanad gudihiis markii uu helo. Haddii muddada aad lacagta ku isticmaalayo aysan wali dhammaan marka aad hesho warqada dib u eegista risiitka, waxaad noosoo diri kartaa iimayl waxaadna naga codsan kartaa wakhti dheeraad ah.

Haddii aadan qeyb kamid ah deeqda aadan waxba ku kharash garaynin ama dhammaan lacagaha deeqda ah aad hayso wakhtiga aad lacagta wax ku iibsan lahaydna la dhaafay, waxaad jabisay shuruudaha iyo xeerarka deeqda. Iimyl noo soo dir sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah adigoo sharraaxaya xaaladda.

Xiritaanka Kiiska

Kadib marka aad soo dirto nuqlada risiityada, waxay qaadan kartaa dhowr todobaad in DCYF dhameystirto dib u eegista. Haddii rasiityadaadu ay ku jiraan lacagta guud ee deeqdaada oo lacagta lagu kharash gareeyay qaybaha alaabaha la ogolyahay aadna ku kharash gareysay isla wakhtiga loogu talagalay, waxaad heli doontaa warqad DCYF ka socota oo kuu sheegaysa in dib u eegistaada rasiityada si guul leh loo xiray.

Haddii DCYF u baahan tahay risiityo dheeraad ah, waxaan kugula soo xariiri doonaa iimayl si aan kuugu sheegto wixii kale ee aan u baahanahay. Halkaan waxaa ku qoran qaar kamid ah sababaha DCYF kaaga baahan karto wax dheeraad ah ama risiityo kale:

Haddii cadadka guud ee lacagta risiityada aad soo dirtay aysan la mid ahayn lacagta deeqda buuxda ee aad heshay.

Haddii risiityada aad soo dirtay kujiraan waxyabo aad iibsatay wakhtiga loogu talagalay wakhti ka baxsan.

Haddii risiityada aad soo dirtay kujiraan alaaboo aan la oggolayn inaad ku iibsato lacagaha deeqda ah.

Su'aalo ma qabtaa?

Iimyl noosoo dir dclf.needsbasedgrants@dclf.wa.gov with any questions. Sidoo kale waxaad la xariiri kartaa Tababarahaaga Early Achievers si uu kaaga caawiyo dib u eegista risiityada.